Farriintan waxaa la soo galiyay onlaynka iyadoo ku qoran English, Español, 简体中文, اللغة العربية, Русский, Soomaali, iyo Tiếng Việt.

**Maajo 19, 2025**

**Ku socota**: Xubnaha bulshada I/DD, la hawlgaleyaasha Qabaa'ilka iyo shaqaalaha ODDS
**Ka socoto:** Dana Hittle, Agaasimaha Kumeelgaarka ah, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (Office of Developmental Disabilities Services, ODDS)
**Mawduuca: Wargelinta hakinta kumeel gaarka ah ee bixiyayaasha**

Ma nabad baa,

Farriintan waxaa loogu talogalay bulshada naafooyinka garashada iyo koboca (I/DD). Warkaan wuxuu muhiim u yahay:

- Wakaaladaha bixiyaha ee mustaqbalka
- Wakaaladaha bixiyaha ee sugaya in codsiyadooda dib loo eego
- Wakaaladaha bixiyaha ee hadda jira
- Hay'adaha maareynta kiiska

Xarumaha fadaraalka ee Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) waxay oggolaadeen codsigeena ku aaddan hakinta kumeel gaarka ah ee

Wakaaladaha Nooca Caadiga ah ee cusub iyo bixiyayaasha hoyga ee 24-ka saac ee Oregon. Hakintan waxa loo yaqaan hakinta kumeel gaarka ah (moratorium). Waxaanu markii hore samaynay codsigan Janaayo. Waxaanu wada hadal kula jirnay CMS ilaa markaas. Hadda go'aankoodii waanu helnay.

## Goorma ayey hakinta kumeel gaarka ah bilaabmi doontaa? Maxaa Dhici Doona?

Hakinta kumeel gaarka ah waxay bilaabmaysaa Juun 2, 2025. Ilaa wakhtigaas, ODDS waxay joojin doontaa ka hawlgalidda codsiyada:

- Wakaaladaha Nooca Caadiga ah ee cusub ee Taageerada Nolosha Bulshada (SMA)
- Wakaaladaha bixiyaha guriga ee cusub ee shaqeeya 24-ka saac

Intaas waxa dheer, inta xakinta kumeel gaarka ah ay jirto:

- Bixiyayaasha hoyga ee 24-ka saac ee jiraa ma furi karaan guryo cusub
- Wakaaladaha bixiyayaasha ee jiraa ma soo kordhin karaan oggolaansho SMA oo cusub

## Hakinta kumeel gaarka ah ma mid waligeed jiraysaa? Muddo intee leeg ayey jiri doontaa?

Hakinta kumeel gaarka ah wax sii jiraya ma aha. Waxay jiri doontaa lix bilood.

## Muxuu ODDS sidaan u yeelayaa?

- Si loo horumariyo tayada adeegyada I/DD iyo taageerada macmiilka
- Si loo hubiyo hoggaansanka bixiyayaasha iyo badbaadada dadka
- Si loo dhimo halista khiyaanada, wax khasaarinta iyo xadgudubka
- Si loo hubiyo adeegyada la heli kara inay yihiin kuwa dadku u baahan yihiin
- Si aan uga dhigno shaqadeena ku aaddan yoolashan mid wax-ku-ool ah

Saddexdii sano ee lasoo dhaafay intii lagu jiray, codsiyada ka imaanayay wakaaladaha bixiyaha waxay kordheen 240%. Hadda markii la eego inta ay dhan yihiin shaqaalaha ODDS, ma awoodno inaanu ka shaqeyno dhammaan codsiyadan cusub. Sidaas darteed hadda waxa yaala hawlo dhan oo ah:

- Codsiyada 438 wakaaladood ee SMA iyo hoyga 24-ka saac
- 375 codsi oo ku aaddan guryaha 24-ka saac

In hawlahan yaala laga shaqeeyo waxay ka qaadanaysaa wakhti badan caawinta bixiyayaasheena jira. Shaqaalaha ayey ahayd inay dadaal badan galiyaan ka hawlgalidda codsiyada. Sidaas darteed, awood uma yeelanayaan inay awoodda saaraan kaalmada farsamo iyo la socodka u hoggaansanka. Hakinta ayaa iyaga waqti badan siin doonta si loo xakameeyo loona kaalmeeyo bixiyeyaasha haatan jira. Tani waxay dhimi doontaa halista khiyaanada, wax khasaarinta iyo xadgudubka.

### Maxaa ku dhacaya codsiyada ku jira hawlaha hadda harsan?

CMS waxay nooga baahan tahay inaanu dhammaystirno dhammaan codsiyada ku jira hawlaha harsan. Tani waxay kaliya saamaynaysaa:

- Wakaaladaha Nooca Caadiga ah ee cusub ee Taageerada Nolosha Bulshada (SMA)
- Oggolaanshaha wakaaladaha bixiyaha hoyga 24-ka saac ee cusub
- Shatiyada hoyga 24-ka saac ee cusub

Ma aqbali doono codsiyada cusub ee kuwan xilliga hakinta kumeel gaarka ah.

Haddaad tahay bixiye soo socda oo sugaya codsi la gudbiyey, ODDS Licensing ayaa toos kuula soo xiriiri doonta labada maalmood ee soo socda. Dib ayaad u codsan kartaa kadib marka hakinta kumeel gaarka ah dhammaato.

### Miyey ODDS samayn kartaa ka reebitaano hakinta kumeel gaarka ah?

Maya. CMS way diiday codsigeena ka reebitaanada.

### Miyay hakintu saameyn doontaa shakhsiyaadka adeegyada hela?

Maya. Hakintu kuma sii adkeyn doonto qofna helitaanka adeegyada. Waxaanu haynaa bixiyeyaasha 24-ka saac oo aad u badan oo ku sugan gobolka. Bixiyeyaashan ayaa haya ku dhawaad 900 oo fursadood. Tani aad ayay uga badan tahay baahida hadda jirta.

Hakinta kumeel gaarka ah kama joojinayso bixiyayaasha SMA ee hadda jira inay shaqaaleeyaan xirfadlayaasha taageero oo toos ah si ay u daboolaan baahiyaha dadka.

**Miyey hakinta kumeel gaarka ah saamaynaysaa hirgalinta Wakaalad Doorasho leh (Agency with Choice) oo lagu maamulo SB 1521?**

Maya. ODDS waxay wali horey ugu soconaysaa kobcinta Wakaalad Doorasho leh ugu dambayn Janaayo 1, 2026.

**Sidee ayey ODDS u hubin doonaa in dadka bulshooyinkan ay heli karaan bixiyayaal?**

Waxaanu dib ugu eegi doonaa si bille ah xogta fursadda marka la eego isbeddelada soo baxaya. Waxaanu warbixin u gudbin doonaa CMS si bille ah. Hadday jiraan xaalado gooni-gooni ah halkaasoo SMA iyo bixiyayaasha 24-ka saac loo baahan yahay, waxaanu ka caawin doonaa hay'adaha maaraynta kiisaska inay helaan bixiyayaal loogu talogalay dadka baahan.

**Maxaa xiga oo dhici kara?**

Waxaanu joojin doonaa aqbalitaanka codsiyada cusub ee SMA iyo bixiyeyaasha 24-ka saac Juun 02, 2025. Waxaanu samayn doonaa tan lix bilood.

Waxaanu rabnaa inaanu hubino inaanu haysano bixiyayaal tayo leh. Mustaqbalka waxaanu raadinaynaa xal baaxad leh oo looga hortagayo codsiyada aan laga hawlgalin urura. Si aanu tan u samayno, waxaanu samayn doonaa isbeddelo xeer. Waxaanu dhaqangalin doonaa xeerar xaaladda gurmadka ah oo kumeel gaar ah oo awoodda saaraya tayada, helitaanka iyo badbaadada. Tan kadib, waxaanu martigalin doonaa Guddida La-talinta Xeerarka marka la eego isbeddelada xeerarka ee abadiga ah. Waxaanu soo dhigi doonaa macluumaadka ku saabsan kulamadan webbeejkeena Kaqaybalinta iyo Casriyeynta.

Hoggaanka ODDS iyo ani ayaa wixii xog ah ee soo kordha had iyo jeer ku wargalin doona nala hawlgaleyaasha inta shirarka lagu jiro. Haddii isbaddallo ay ku yimaadaan qorshaheena, waxaan soo diri doonaa farriin kale oo bulsho. Farriintan waxa sidoo kale la soo dhigayaa webbeejkeena bixiyayaasha mustaqbalka.

Haddii aad su’aalo qabtid, fadlan iimayl u dir dd.licensing@odhsoha.oregon.gov.

Waad ku mahadsan tahay iskaashigaaga muddada aynu ka shaqaynayno horumarinta adeegyadeena.

Nabadgelyo,



Dana Hittle
Agaasimaha Kumeelgaarka ah
Xafiiska Adeegyada Naafooyinka Korriinka (Office of Developmental Disabilities Services, ODDS)

---

Isku diiwaangeli wargelinada xafiiska ODDS.
Ka akhri farriimaha Agaasimaha ODDS barta https://www.oregon.gov/odhs/agency/Pages/odds.aspx#dm.
Nagala soco Facebook-ga @oregonDHS.IDD.

Waxaad ku heli kartaa bilaash dukumintigaan isagoo ku qoran luuqado kale, far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay u qoran. Kala xiriir Oregon ODDS lambarka 503-945-5811 ama dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov. Waxaanu aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka Dhegaha La', Maqalka Ku Adag Yahay, Dhegaha iyo Indhaha La', dadka aragga la’ ama araggoodu hooseeyo. Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyeyaasha adeegga gudbinta booqo https://www.oregonrelay.com ama https://www.fcc.gov/general/internet-based-trs-providers.